# FEDERAALEYNTA GARSOORKA SOOMAALIYA

Qorey: Avv. Burhaan Aadan Cumar

## Tusmada


1.0. Hordhac ........ 2

2.0. Habraaca Cilmibaarista Loo Maray ........ 3

3.0. Taariikh Kooban ee Garsoorka Soomaaliya ........ 3

3.1. Nidaamkii Garsoorka iyo Marxaladdii Jamhuuriyaddii Kowaad (1960-1969): ........ 3

3.2. Nimaadka Garsoorka iyo Marxaladdii Jamhuuriyaddii 2aad: (1969-1991): ........ 4

3.3. Nidaamkii Garsoorkaa iyo Jamhuuriyaddii 3aad (2000-2022): ........ 5

4.0. Noocyada Hannaanka Federaaleynta Garsoorka ........ 6

4.1. Hannnaanka Garsoorka Midaysan (Unified Judiciary System): ........ 7

4.2. Hannaanka Is-bar-bar socda ( ........ 8

4.3. Hannaanka Isku dhafka ah (Integrated Judiciary system): ........ 10

5.0. Hannaanka Garsoorka ee ku Habboon Soomaaliya: ........ 10

5.1. Heshiiskii Jowhar ........ 11

5.2. Mawqfika XFS ee Hannaanka Garsoorka 2018 ........ 11

5.3. Soojeedintii Guddiyadii Dib-u-eegista Dastuurka: ........ 12

5.4. Nooca Garsoor ee ugu habbnoon Dalka Soomaaliya: ........ 12

6.0. Arrimaha ugu Muhiimsan ee Dhismaha Garsoor Federaal oo ku Habbnoon Dalka Soomaaliya: ........ 13

6.1. Maamulka Garsoorka: Golaha Sare ee Garsoorka ........ 13

6.2 Golaha Sare ee Garsoorka Soomaaliya ........ 14

6.3 Dhisidda Golaha Sare ee Garsoorka ee ku Habboon Soomaaliya ........ 16

6.4 Maxkamadda Dastuurka ........ 16

6.5 Dhisidda Maxkamadda Dastuurka ee ku habboon Soomaaliya ........ 18

6.5 Qaab-dhismeedka Maxkamadaha ........ 18

7. Caqabadaha Hortaagan Federaaleynta Garsoorka ........ 19

8. Gunnaand ........ 19

9. Talo Soojeedin ........ 20

## 1.0. Hordhac

Federaalku waa hannaan dawladeed oo awoodaha loogu qeybiyo heerarka kala duwan ee dawladeed ee kala ah heer federaal, heer Dawlad-Goboleed ama/iyo dawladaha hoose. Dastuurka KMG ah ee Soomaaliya ee la ansixiyey bishii Agoosto 2012 waxa uu dhisay dawlad federaal ah oo mabaadi'deeda asaasiga ah ay ku dhisan yihiin mabaadi'da awood-qeybsiga Nidaamka Federaalka[1]. Hase yeeshee, Dastuurku ma siin mudnaantii iyo faahfaahintii Federaaleynta heerarka dawladda looga baahnaa, si cadna uma kala qeybin awoodaha heerarka kala duwan. Astaynta awoodaha waxaa dib loogu dhigay in heshiis siyaasadeed ay ka gaaraan hay'adaha fulinta ee heer federaal iyo heer Dawlad-Goboleed.

Nidaamka dawladeed ee dalku waa mid u qeybsan saddex laamood oo kala ah: laanta xeer-dejinta (Baarlamaan), laanta fulinta iyo laanta garsoorka. Laanta garsoorka ee dawaladaha federaalka ah waxa ay kaalin weyn ku leedahay qaabeynta isku dheellitirka awoodda Dawladda ee heerarka kala duwan, maadaama uu garsoorku ilaaliyo awoodaha dastuuriga ah ee loo qeybiyey heerarka dawladda, uuna difaaco xuquuqda muwaadiniinta uu dastuurku ilaaliyo. Dastuurka KMG ahi si kooban buu uga hadlay Federaaleynta Garsoorka sida ku cad qodobka 108. Waxaa la isku dayey dhowr jeer in laga heshiiyo dhismaha garsoor federaal ah sida Heshiiskii Jowhar ee 2018-kii, balse heshiiskaasi ma miradhalin.

Ujeeddada qoraalkan waa diyaarinta daraasad ku saabsan noocyada hannaanka federaal ee garsoor ee adduunka ka jira iyo kan ugu habboon garsoorka Soomaaliya iyada oo falanqeyn ku sameynaysa heshiiskii Jowhar iyo soojeeintii guddiyada dib- u-eegista Dastuurka KMG ah. Daraasaddani waxa ay soo bandhigaysaa taariikh kooban oo qeexaysa marxadalaha uu soo maray garsoorka iyo qaab-dhismeedka garsoorka dalka. Cilmibaaristaan waxa ay qeyb ka tahay dedaallada socda ee la rabo in lagu yagyeelo nidaam garsoor federaal ah oo awood u leh bixinta adeeg caddaaladeed oo loo simman yahay oo ay fulinayaan hawl-wadeenno leh aqoon, karti iyo hufnaan, oo aan lagu aqoon eex iyo musuqmaasuq.

[1] Dastuurka Federaalka Ku-meel gaarka ah, Agoosto 2012, Qodobka 3 (3)

## 2.0. Habraaca Cilmibaarista Loo Maray


Daraasadani waxa ay ka duulaysaa dukumentiyo ay ka mid yihiin Dastuurkii KMG ah, heshiiskii Jowhar, warbixinnadii iyo soojeedintii Guddiyada Dib-u-eegista Dastuurka ee 2016 iyo 2020, Axdi-qarameedkii kumeelgaarka ahaa ee 2000, Axdiga Federaalka KMG ah ee 2004. Sidaa oo kale, daraasadani waxa ay la sameesay xog-waraysiyo dad xog ogaal ah, waxaana lala kaashaday cilmibaarisyo laga sameeyey mawduucaan iyo buugag ay qoreen khuburo ku xeel-dheer federaaleynta iyo garsoorka.

## 3.0. Taariikh Kooban ee Garsoorka Soomaaliya

Garsoorka Soomaaliya waxaa uu soo maray marxaladooyin kala duwan, amase waxaa la dhihi karaa dawladda Soomaaliya ay hadba heer maraysey. Heer kastana waxaa jiray dastuur iyo xeerar la socda xilligaas. Waxaan shaki ku jirin in uu heerba heerkii ka horreeyey wax ka beddelay, isla markaana ay jiraan waxyaabo heerka dambe uu ka shidaal qaato heerkii ka horreeyey ilaa intii laga soo gaarayey waqtigii u dhexeeyey 2004-2012. Haddaba, qeybaha soo socda waxaan ku soo bandhigi doonnaa taariikhda garsoorka oo u kala qeybsan seddexdii marxaladood ee ay Soomaaliya soo martay.

### 3.1. Nidaamkii Garsoorka iyo Marxaladdii Jamhuuriyaddii Kowaad (1960-1969):

Dastuurkii 1960-kii waxa uu si kooban u tilmaamay awoodaha iyo madaxbannaanida garsooridda[2], isaga oo





[2] Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliya 1960, Qodobada 92-93.

qeexay Maxkamadda Sare[3] in ay tahay tan ugu sarreysa maxkamadaha Jamhuuriyaddda. Dastuurkii 1960-kii waxaa kale oo uu tilmaamay in xeer[4] lagu soo saarayo qaab-dhismeedka iyo awoodaha makamadaha. Xeerka Nidaamka Garsoorka ee 1962 waxa uu mideeyey makamadaha dalka iyada oo la dhisay garsoor hannaan midaysan ah oo u qaabeysan sida soo socota[5]:

1. Maxkamadaha Degmooyinka;
2. Maxkamdaha Gobollada;
3. Maxkamadaha Racfaannada, iyo
4. Maxkmadda Sare ee Dalka.

Islamarkaasna, waxa uu dhisay Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud oo ka kooban Xeer-Ilaaliyaha Guud iyo ku xigeenno[6].




### 3.2. Nimaadka Garsoorka iyo Marxaladdii Jamhuuriyaddii 2aad: (1969-1991):

Dastuurkii 1979-kii waxa uu dhisay nidaamka garsoor hannaan midaysan, qodobka 97[7] ayaa sidatan u qeexay "Garoorka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waa mid mideysan". Maxkamadaha uu dhisay Dastuurka 1979[8] waa Maxkamadda Sare, Maxkamadaha Rafcaanka, Maxkamadaha Gobollada[9], Maxkamadaha Degmooyinka, Guddiyada Garsoorka ee goobaha shaqada iyo Maxkamadaha Ciidammada Qalabka Sida. Dhinaca Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud waxa uu tilmaamay in Xafiisku uu ka kooban yahay Xeer-Ilaaliyaha Guud iyo ku xigeenno Xeer-Ilaaliye[10]. Sidaa oo kale, Qoqobka 109 ee Dastuurkii 1990 si

[3] Dastuurka 1960, Qodobka 94aad.
[4] Dastuurka 1960, Qodobka 94 (2).
[5] Xeerka Nidaamka Garsoorka Lr. 3 ee soo baxay 12 June 1962, Qodobka 1aad.
[6] Xeerka Nimaamka Garsoorka 1962, Qodobka 7aad
[7] Dastuurka 1979, Qodobka 79aad
[8] Dastuurka 1979, Qodobka 100aad
[9] Xeerka Nidaamka Garsoorka ee soo baxay baxay 2/8/1974(Sharci Lr.34), Qodobka 6aad
[10] Dastuurka 197, Qodoba 103. iyo Xeerka Nidaamka Garsoorka ee soo baxay baxay 2/8/1974(Sharci Lr.34), Qodobka 14

cad ayuu u qeexay in Garsoorka Jamhuuriyaddu yahay mid midayasan, isaga oo si toos u qeexay in xafiiska Xeer-Ilaalinta guud uu yahay hay'ad garsoor oo midaysan[11].

### 3.3. Nidaamkii Garsoorkaa iyo Jamhuuriyaddii 3aad (2000-2022):

Muddo dheer oo aanay Dawlad rasmi ah ka shaqeynin Soomaaliya ka dib, waxaa la dhisay dawladdii KMG ahayd ee lagu heshiiyey magaalada Carta ee dalka Jabbuuti. Axdi Qarameedkii lagu dhisay Dawladda waxaa uu u gogol xaarey in la dhiso dawlad Federaal ah. Axdigii Federaaliga KMG ee dhisay Dawladdii Federaalka KMG ah waxa uu dhigay garsoor federaal KMG ah oo qaab-dhismeedka maxkmadauhu uu ka kooban yahay[12]:

a) Maxkamadda Sare ee ku meel gaarka ah;

b) Maxkamadda Racfaanka ee ku meel gaarka ah, iyo

c) Maxkamadaha kale ee sharcigu dhiso.

Sidaa oo kale, waxa uu dhisay Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud in uu ka kooban yahay Xeer-Ilaaliyaha Guud ee heer federaal iyo Xeer-Ilaaliyeyaasha Dawlad-Goboleedyada iyo degmooyinka[13].

Dastuurka KMG ah ee 2012 waxa uu qeexayaa dhismaha maxkamadaha seddex heer oo kala ah:


(a) Maxkamadda Dastuurka;

---

[11] Dastuurka 1990, Qodobka 112
[12] Axdiga Federaalka KMG ah ee 2004, Qodobka 60aad
[13] Axdigii 2004, Qodobka 64

(b) Maxkamadaha heer Dawlad Federaal; iyo

(c) Maxkamadaha heerka Dawladaha xubinta ka ah Dawlada Federaalka. Maxkamadda ugu sarraysa dalka ee Heer Federaal waa Maxkamadda Sare ee Federaalka, iyada oo Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka iyaguna yeelanayaan Maxkamad Sare ee heer Dawladaha Xubnaha ka ah federaalka (DXDF) oo iyaga u gaar ah.




Cutubka sagaalaad ee Dastuurka KMG ah si faah-faahsan uma qeexin qaab-dhismeedka maxkamadahada iyada oo aan lagaba hadlin faah-faahin ku aadan Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka. Sidaa oo kale, qodobka 120[14] ayaan sheegin in laanta gaarsoorka lagu nidaaminayo dastuurrada Dawlad-Goboleedyada waxa uu tilmaamay in dhismaha laamaha sharci dejinta iyo fulinta ee maamullada Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka lagu nidaaminayo Dastuurrada maamul-goboleedyada. Soomaaliya waxa ay qaadatay nidaamka Federaalka balse weli waxaa ka jira gaabis badan oo dhinaca qeexidda federaleynta hay'adaha dawladda sida Maxkamadaha iyo Xeer-Ilaalinta.

## 4.0. Noocyada Hannaanka Federaaleynta Garsoorka

Nidaamyada Federaaleynta garsoorka waa ay kala duwan yihiin, waxaana jira seddex hannaan oo dalalka federaalka intooda badan ay kala adeegsadaan oo kala ah:[15] hannaanka garsoorka midaysan (Unified Judicicary Structure), hannaaka is-bar-bar socda (Dual Judiciary Structure); iyo hannaaka isku dhafka ah (Integrated Judiciary Structure). Ma jiro hannaan adduunku isku raacsan yahay in uu ka wanaagsan yahay kuwa kale, mana jiro hannaan la dhihi karo midkaan ayaa ku

[14] Dastuurka KMG ah,2012

[15] Commentary on the 2012 Somali Provisional Constitution, Max Planc Foundation for International Peace and the Rule of law (MPFPR), June 2014-June 2016, bogga 140.

habboon dal walba, balse xaaladaha iyo duruufaha dalka ayaa kallifa in uu doorto nooca hannaan ee ugu habboon, iyada oo la eegayo arrimaha soo socda:


- Awoodaha maxkamadaha;
- Madaxbannaanida hay'adaha garsoorka;
- Maamulka hay'adaha garsoorka;
- Magacaabista Garsooreyaasha iyo Xeer-Ilaaliyeyaasha;
- Masuuliyadda maaliyadeed ee garsoorka.

Cilmibaaristaani waxa ay soo bandhigaysaa seddexda hannaan sida ay u shaqeeyaan iyo qaar ka mid ah wadammada adeegsada, si aan u helno hannaanka ugu habboon dalka Soomaaliya.

### 4.1. Hannnaanka Garsoorka Midaysan (Unified Judiciary System):

Hannaankani waxa uu dhisayaa hay'ado garsoor midaysan oo awood u leh dhammaan in ay galaan dacwadaha ikhtisaas ka ay u leeyihiin iyada oo aan loo eegeyn xeer, deegaan iyo awood kale toona. Nidamakani waxa uu isku xirayaa maxkamadaha dhammaan heerarka oo la mid ah sida dalalka aan ahayn federaalka, waxa uuna la mid yahay nidaamkii soojireenka ahaa ee Soomaaliya lahayd.

Qaab-dhismeedka hannaanka maxkamdaha midaysan waxa uu ka koobnaanayaa, Maxkamadda Sare oo ahaaneysa maxkamadda ugu sarreysa oo cabasho loo qaadanayo aan ka ahayn arrimo dastuureed, Maxkamadaha Racfaanka (oo ku yaal magaalo madaxyada Dawlad-Goboleedyada), iyo maxkamadaha darajada koowaad oo ka kooban maxkamadaha gobollada iyo degamooyinka.




Dalalka isticmaala hannaanka garsoorka midaysan waxaa ka mid ah Koonfur Afrika iyo Myanmar.

Koonfur Afrika (South Africa): waa dal leh hannaan federaal ah, waxa uuna adeegsadaa hannaanka garsoorka midaysan, waxa uu leeyahay Maxkamadda

Dastuurka, Maxkmadda Sare (Supreme Court) ee arrimaha racfaanka aan ka aheyn arrimaha dastuurka, Maxkamadda kore (High Court), maxkamadaha majistaraydyada iyo maxkamadaha kale ee dalka. Dhammaan garsooreyaasha Koonfur Afrika waxaa laga maamulaa lagana soo magacaabaa heer federaal[16].


Hannaankan midaysani aad buu u sahlan yahay oo si fudud ayaa loo fahmi karaa, waana ka kharash yar yahay labada hannaan ee kale, waxaana si fudud loo fulinayaa dhammaan shuruucda iyo xeerarka kala duwan ee dalka. Wareesiyadii lala yeeshay dadka xog-ogaalka waxa uu tilmaamayaa in hannaanka garsoorka midaysan uusan ahayn mid ka shaqeynaya dalka Soomaaliya iyada oo la eegayo duruufaha, marxaladda siyaasadeed iyo dastuur ee dalku marayo.

### 4.2. Hannaanka Is-bar-bar socda (Dual Judiciary structure)

Hannaankani waxa uu dhisayaa nidaam ah in dalku leeyahay laba heer maxkamadood taas oo ah in maxkamadaha federaalku ay gelayaan shuruucda faderaalka halka maxkamadaha Dawlad-Goboleedyadu ay gelayaan shuruucda Dawlad-Goboleedyada oo keliya. Xukuumadda Faderaalku waxa ay masuul ka tahay dhisidda iyo maamulka maxkamadaha federaalka, halka Dawlad-Goboleedyadu ay ka masuul yihiin dhisidda iyo maamulka maxkamadaha Dawlad-Goboleedyada oo keliya. Golaha Sare ee Garsoorka waxa uu maamulaya hay'adaha garsoorka ee heer federaal oo keliya, halka Dawlad-Goboleed kastaa uu u baahan yahay in uu dhisto Gole Garsoor oo maamula hay'adahooda garsoor.

[16] Dastuurka Koonfur Afrika, Qodobka 166aad

Waxa aad mooddaa in Dastuurka KMG ah[17] uu tan ku dhisay marka uu ka hadlayey si kooban maxkamadaha kala saaran ee seddex heer oo ah in Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ay leedahay Maxkamadda Sare iyo Maxkmad Dastuur halka ay Dawlad-Goboleedka kasta yeelanayso Maxkamad Sare.




Hannaankani waxaa adeegsada wadamo ay ka mid yihiin Maraykanka iyo Australia, Itoobiya, Argentina.

Dawladda Maraykanka: Dalka Maraykanku waxa uu leeyahay garsoor laba heer ah, heer Federaal iyo heer Dawlad-Goboleed. Sida ka muuqata jaantusak kore, heer federal waxaa ka jira Maxkamadda sare, maxkamadaha racfaanka iyo Maxkamdaha hoose, waxa ayna awood u leeyihiin dacwadaha federaalka ah iyaga oo adeegsanaya xeerarka iyo shuruucda federaalka ah. Dhinaca kale, Dawlad Goboleeyadu waxa ay leeyihiin Maxkamad sare, Maxkamadaha Racfaanka iyo Maxkamadaha hoose, waxayna awood u leeyhiin garsooridda dacwadaha xeerarka heer Dawlad-Goboleed.

Inkasta oo hannaankani uu leeyahay faa'iidooyinka ay ka mid tahay in uu yareynayo khilaafaadka awoodeed (ikhtisaas) ee fulinta shuruucda iyo weliba maamulidda hay'adaha garsoorka oo uu heer kasta maamulanayo garooreyaashiisa, Hase yeeshee, waxa uu leeyahay cillado badan oo ay ka mid tahay in loo baahanayo dhaqaale iyo howl-wadeenno aad u badan, waxa uuna abuuri kara khilaaf iyo tartan u dhexeeya maxkamadaha heer federaal iyo heer Dawlad-Goboleed maadaama ay weli wada dabaqayaan shuruucdii dalka oo aan weli la federaalayn. Tusaale ahaan, Dawladda Federaalka waxa ay yeelanaysaa Makamado iyo xafiisyo Xeer-Ilaalin oo heer federaal iyo kuwo heer Dawlad-Goboleed ah, taas oo macnaheedu yahay in la helo garsooreyaal, Xeer-Ilaaliyeyaal iyo hawl-wadeeno kale oo ka hawlgala dhammaan gobollada iyo degmooyinka dalka oo dhan, intaas oo ay sii dheer tahay in Dawlad-Goboleed kasta ay leedahay

[17] Dastuurka Federaakha KMG ah,2012, Qodobka 108aad

garsooreyaal, Xeer-Ilaaliyeyaal iyo hawl-wadeeno ka hawlgala dhammaan gobollada iyo dagmooyinka Dawlad-Goboleedka.

### 4.3. Hannaanka Isku dhafka ah (Integrated Judiciary system):

Hannaankani waxa uu abuuarayaa nidaam Dawladda Federaalka iyo Dawlad-Goboleedyadu ay ku wadaagayaan garsoorka, taas oo ka dhigan in maxkamadaha hoose ay awood u leeyihiin in ay galaan dhammaan dacwadaha federaalka iyo kuwa DXDF, iyaga oo adeegsanaya xeerarka Dawladda Federaalka ah iyo xeerarka Dawlad-Goboleedkaba, dalkuna waxaa uu yeelanaya Maxkamad Sare oo loo soo qaato racfaanada la xiriira dacwadaha federaalka.

Ujeeddada hannaankani waa in la helo masuuliyado ay wadaagayaan Xukuumadda Federaalka iyo Dawlad-Goboleedyada oo la xiriira maamulka garsoorka iyada oo uu jirayo hal nidaam garsoor oo kaliya kaas oo maxkamadaha siinaya awoodo cad iyo habka loo qaadanayo rafcaanka. Nidaamkaan waxaa adeegsada wadamo ay ka mid yihiin Nigeria, Canada, Germany iyo India.

Dalka Jarmalka (Germany): Dawladda Federaalku waxa ay maamushaa Maxkmadaha heer federaal sida Maxkamadda Dastuuraka iyo Maxkamadda sare, halka Dawlad-Goboleedyadu ay maamulaan maxkamadaha hoose oo ay ka mid yihiin Maxkamadaha Racfaanka[18].

## 5.0. Hannaanka Garsoorka ee ku Habboon Soomaaliya:

Dalka Soomaaliya si uu u doorto nooca Garsoor ee ugu habboon waa in la tixgaliyaa xaaladda siyaasadeed, dhaqaale, amni iyo sharci ee dalku ku jiro. Si loo helo hannaanka ugu habboon ee garsoor, waxaan halkaan ku soo bandhiygaynaa heshiiskii Jowhar, Mawqifkii XFS 2018 iyo soojeedintii guddiyada Dastuurka, iyada oo la soo koobayo nuxurkooda iyo weliba soo jeedintooda.

[18] Commentary on the 2012 Somali Provisional Constitution, Max Planc Foundation for International Peace and the Rule of law (MPFPR), June 2014-June 2016, bogga 141.

### 5.1. Heshiiskii Jowhar

Muddoo dheer ka dib oo aan weli la federalayn garsoorka dalka, Dawladda Federaalka iyo Dawlad-Goboleedyadu waxa ay heshiis ku gaareen magaalada Jowhar 2018, heshiiskaas oo nuxurkiisu ahaa[19]:

1. Heshiisku waxa uu qeexay in nooca ugu habboon Soomaaliya uu yahay hannaanka isku dhafka ah, taas oo aheyd arrinta ugu muhiimsan ee ka soo baxday heshiiskii Jowhar.
2. Heshiisku waxa uu dhisay qaab-dhismeed ah in dalku yeelanayo hal Maxkamad Dastuur, Maxkamad sare ee heer Federal, Maxkamad Sare ee Dawlad-Goboleed, Maxkamadaha Racfaanka iyo Maxkmadaha Darajooyinka Kowaad. Maxkamadaha Gobolka Banaadir in ay ahaanayaan sida hadda ay yihiin ilaa inta go'aan laga gaarayo maqaamka caasimadda.
3. Heshiisku waxa uu abuuray laba Gole oo Garsoor oo gooni kala ah, heer Federaal iyo heer Dawlad-Goboleed.
4. Heshiisku waxa uu dhisay laba xafiis Xeer-Ilaalin oo heer federaal iyo heer Dawlad-Goboleed, iyada oo Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranku uu xafiisyo ku yeelanayo Dawlad-Goboleedyada isaga oo masuul ka ah dhammaan dacwadaha federaalka ah.

Heshiiska Jowhar waxaa ku xayndaaban cillado farsamo iyo mid sharci oo la xiriira fulintiisa oo ay ka mid tahay in heshiisku uu farayay dhisidda laba gole maamul oo isbarbar socda, iyada oo garsooreyaasha maxkamadaha hoose ay awood u leeyihiin in ay galaan dacwacdaha federaalka iyo kuwo Dawlad-Goboleed balse maamulka iyo magacaabista hay'adaha garsoorka waxa uu ka dhigaya mid mugdi badan ka jiro.

### 5.2. Mawqfika XFS ee Hannaanka Garsoorka 2018

Cilladahaas soo baxay dartood ee fulinta heshiiskii Jowhar waxa ay kalliftay in Golaha Wasiirrada 6-dii bishii Agoosto 2018 ay soo saareen Mawqifika XFS ee Hannaanka Gasrsoorka, iyada oo Goluhu uu xoojiyey in hannaanka ugu habboon Soomaaliya uu yahay midka isku dhafka ah. Goluhu waxa uu ku sameeyay heshiiskii Jowhar wax-ka-baddello ay ka mid yihiin[20]:

[19] Heshiiska Siyaasadeed ee Hannaanka Caddaaladda iyo Asluubta Soomaaliya ee lagu Gaaray Magaalo Madaxda Jowhar ee Dowlad Goboleedka Hirshabeelle, 23-24 Janaayo 2018(Heshiiska Jowhar)
[20] Mawqifka Xukuumadda Federaalka Soomaaliya eek u aaddan Heshiiska Jowhar ee soo baxay 2018.

- In Dalku leeyahay Hal Maxkamad Dastuur.
- In qaab-dhismeedka Maxkamaduhu uu noqdo hal Maxkamad sare oo heer federaal ah, Maxkamadaha Racfaanka heer Dawlad-Goboleed oo ah Maxkamadda ugu sarreysa ee heer Dawlad-Goboleed, maxkamadaha Gobollada iyo Degmooyinka.
- In la dhiso hal Gole Adeeg Garsoor oo maamulaya hay'adaha garsoorka ee heer federaal iyo heer Dawlad-Goboleed, halka heshiiskii Jowhar uu dhisay laba gole adeeg garsoor oo kala ah heer federaal iyo heer Dawlad-Goboleed.

### 5.3. Soojeedintii Guddiyadii Dib-u-eegista Dastuurka:

Guddiga La Socodka Dib-u-eegista Dastuurka iyo Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka waxa ay soojeediyeen arrimaha soo socda[21]:

1. Hannaanka Isku Dhafka ah ayaa ah nooca ugu habboon dalka.
2. Qaab-dhismeedka Maxkamadaha oo loo nidaamiyay Maxkamadda Dastuurka, Maxkamadda Sare ee Federaalka, Maxkamadaha Sare ee Dawlad-Goboleedka iyo Maxkamadaha Hoose oo gelaya dacwadaha heer kasta.
3. Golaha Sare ee Garsoorka oo ah hal gole oo ay ka mid yihiin Guddoomiyeyaasha Maxkamadda Sare iyo Maxkamadda Dastuurka, Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha Sare ee Dawlad-Goboleedyada iyo xubno kale oo ka socda bulsaha iyo ururka Qareennada.

### 5.4. Nooca Garsoor ee ugu habbnoon Dalka Soomaaliya:

Ka dib wareesiyadii iyo fallaanqeyntii dukumentiyada muhiimka ah, cilmibaaristani waxa ay u aragtaa in nooca garsoorka isku dhafka ah uu yahay midka ugu habboon Soomaaliya sababahan awgood:

1. Heshiiskii Jowhar ee u dhexeyey XFS iyo DXDF, mawqifkii XFS ee 2018 iyo soojeedintii guddiyadii dib-u-eegista dastuurka waxa ay dhammaan soojeediyeen in la qaato hannaanka Garsoorka Isku-dhafka ah.
2. Dhaqan-gelinta iyo hirgelinta shuruucda dalka hadda jira oo ay sahlan tahay in ay maxkamadaha ku dabbaqaan si fudud dhammaan deegaannada dalka.

[21] Warbixintii Guddiyada Dastuurka ee 2021.

3. Beekhaaminta dhaqaale iyo yaraynta culaysyada maaliyadeed ee ku dhici kara labada heer ee dawladnimo, iyada oo la eegayo xaalladda dhaqaale ee Dalka oo ay Soomaaliya tahay dal sabool ah, loomana baahnaanayo in la dhiso maxkamado cusub oo waxa hawl-galayaa Maxkamadaha hadda jira.
4. Hannaankani waxa uu meesha ka sarayaa khilaaf iyo tartan u dhexeeya hay'adaha garsoorka, iyaga oo awood u leh in ay dabbaqaan xeerarka Federaalka iyo kuwo Dawlad-Goboleedyada.
5. Hannaan maamul oo wadaag ah oo leh isla xisaabtan iyo korjoogteyn.

## 6.0. Arrimaha ugu Muhiimsan ee Dhismaha Garsoor Federaal oo ku Habbnoon Dalka Soomaaliya:

Iyada oo laga duulayo doorashada nooca isku dhafka ah ee halkaan lagu soojeediyey, daraasaddani waxa ay soo bandhigaysaa arrimaha ugu muhiimsan ee ku habboon dalka.

### 6.1. Maamulka Garsoorka: Golaha Sare ee Garsoorka

Maamulka Garsoorka ee dalalka adduunka qaar waxaa maamula Golaha Adeegga Garsoorka sida Suudan[22], qaar kalana waxaa maamula maxkamada ugu sareysa ee dalka sida Uganda[23], ama hay'adda fulinta sida koonfur Afrika[24].

Inta badan Dastuurradii iyo Axdiyadii Soomaaliya yeelatay iyo dastuurrada Somaliland[25], Puntland[26], Jubbaland[27], Hirshabeelle[28], Koonfur Galbeed[29] iyo Galmudug[30], Golaha Sare ee Garsoorka ayaa leh awoodda maamulka ee Garsoorka.

Dhisidda Gole Sare ee Garsoor oo ka madaxbannaan awoodaha laanta sharcidejinta, laanta fullinta iyo hay'ad kasta oo kale waxa uu laf-dhabar u yahay xaqiijinta garsoor leh dhex-dhexaadnimo, hufnaan, madaxbannaani iyo isla-

---

[22] Dastuurka Suudan ee 2005
[23] Dastuurka Uganda, Qodobka 128 iyo 133
[24] Dastuurka Koonfur Afrika, Qodobka 178
[25] Dastuurka Somaliland, qodobka 108
[26] Dastuurka Puntland, Qodobada 101-102
[27] Dastuurka Jubaland, Qodobka 60,61 iyo 72
[28] Dastuurka Hirshabeelle, Qodobka 61
[29] Dastuurka Koofur Galbeed, Qodobka 70(1)
[30] Dastuurka Galmudug, Qodobka 79

xisaabtan. Goluhu waxa uu masu'uul ka yahay maamulka hay'adaha garsoorka oo ay ka mid yihiin shaqo qorista, ruqseynta iyo dallacsiinta xubnaha garsoorka.

Dalalku waa ku kala duwan yihiin dhismaha golaha garsoorka. Dalalka qaar waxa ay leeyihiin hal gole garsoor halka qaar kale ay leeyihiin laba gole garsoor ee labada heer ah, iyaga oo hadba ku saleeynaya nooca hannaan garsoor ee dalkaas doortay sida hannaanka garsoorka midaysan, kan isku dhafka ah iyo kan isbarbar socda. Sidaa oo kale, dalalku waxa ay ku kala duwan yihiin meelaha ay ka kala imaanayaan xubnaha golaha.

Dastuurka Dawladda Talyaaniga[31] waxa uu dhisayaa Golaha Sare ee Garsoorka oo ka kooban: seddex ku imaanaya xafiisyo oo kala ah Madaxweynaha Talyaaniga, Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, halka 2/3 xubnuhu ay ka imaanayaan hay'adaha garsoorka oo iska dhex dooranaya, halka barlamanaaka labadiisa aqal uu si wadajir ah u dooranayo 1/3 ee Golaha oo ka imaanaya bareyaal sharci iyo qareenno leh 15 sano oo khibrad ah.


Koonfur Afrika: Golaha Sare ee Garsoorku waxa uu kooban yahay[32]:

- Garoorka oo ay ka imaanayaan Guddooomiyaha Maxkamadda Dastuurka, Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo hal Guddoomiye Maxkamadeed.
- Aqalka 1aad ee barlamaanku waxa uu u xilsaarayaa lix ka mid ah xildhibaanada oo ay seddex ka mid ah yihiin mucaaradka, halka Aqalka 2aad uu u xilsaaranayo afar xubood oo aqaalkiisa ka mid ah.
- Ka dib soojeedinta ururada qareennnada iyo sharci yaqaannada, madaxweynuhu waxa uu magacaabaya labo qareen, laba sharci yaqaan iyo hal bare sare ee sharciyada ah.
- Madaxweynaha Koonfur Afrika waxa uu magaabayaa afar xubnood oo dheerad ah ka dib marka uu la tashado hogaanka xisbiyada mucaaradka ah.


## 6.2 Golaha Sare ee Garsoorka Soomaaliya

Xeerka Nidaamka Garsoorka waxa uu dhisayaa Gole Sare ee ka kooban: Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ahna Gudoomiyaha Golaha, Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, Xubnaha Maxkamadda Sare, 3 xubnood oo ay soo doortaan barlamaanku[33].

[31] Dastuurka Dawladda Talyaaniga, Qodobka 104
[32] Dastuurka Koonfur Afrika, Qodobka 178
[33] Xeerka Nidaamka Garsoorka, 1962, Qodobdada 27 iyo 28




Dastuurka KMG ah waxa uu farayaa dhisidda Golaha Adeegga Garsoorka oo maamulaya hay'adaha garsoorka ee heer federaal kana kooban sagaal xubnood sida ka ka muuqata jaantuskan hoose[34]:




Golaha uu dhisay dastuurka iyo sharciga lagu dhisay golaha ma ahan mid ku habboon dalka Soomaaliya marka la eego xubnaha uu ka kooban yahay oo ay ku jiraan laba garsoore oo keliya[35], iyo awoodaha la siiyeyba. Intaas waxaa dheer, waxaa jira mugdi ku aaddan kaalinta uu ku leeyahay maamulidda garsoorka, sida

[34] Eeg qodobada 119(A), 111(a) ee Dastuurka KMG ah iyo Qodobada 5 iyo 6 ee Sharciga Dhisida Golaha Adeegga Garsoorka

[35] Inta badan dalalku, xubnaha Golaha Garsoorku waxa ay ka yimaadaan garsoorka. Tusaale, Dalka Kenya (eeg Qodobka 171), hay'adaha Garsoorka waxaa ka yimaada lix isaga oo Goluhu uu ka kooban yahay 11 xubnood, sidaa oo kale, Dalka Talyaaniga: 2/3 ee Golaha waxa ay ka yimaadeen hay'adaha Garsoorka.

ku cad qodobada 119(A), 111(a) ee Dastuurka KMG ah. Dhanka kale, Heshiiskii Jowhar waxa uu soojeediyey dhisidda laba gole ee labada heer dawladnimo, taas oo ka hor imaanaysa hannaanka la isku raacay ee ah nooca isku dhafka ah ee garsoorka.

### 6.3 Dhisidda Golaha Sare ee Garsoorka ee ku Habboon Soomaaliya

Iyada oo la tixgalinayo marxaladda siyaasadeed iyo dhaqaale ee dalku marayo lana xaqiijiyo madaxbannaanida iyo dhexdhexaadnimada hay'adaha garsoorka waa in la helaa hannaan maamul oo isu-dheellitiran. Cilmibaaristani waxa ay soojeedinaysaa dhisidda hal Gole Sare ee Garsoor oo ka koobnaanaya:

- Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo ugu yaraan hal garsoore oo ka mid ah Maxkamadda Sare;
- Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka;
- Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha Sare ee Dawlad-Goboleedyada; iyo Madaxa Garsoorka Caasimadda, iyada oo la raacayo hadba nooca maqaam ee lagu heshiiyo;
- Laba xubnood oo ay iska dhex-dooranayaan Qareennada Soomaaliyeed;
- Laba xubnood oo ku xeel-dheer sharciga.

Golahan ayaa matalaya heer Federaal iyo heer Dawlad-Goboleed, waxa uuna awood u yeelanayaa in u maammulo dhammaan garsooreyaasha, Xeer-Ilaaliyeyaasha iyo hawl-wadeennada kale ee hay'adaha garsoorka.

### 6.4 Maxkamadda Dastuurka

Dastuurku waa sharciga ugu sarreeya oo ay muhiim tahay in xeerarka iyo shuruucda dal ay waafaqsan yihiin. Haddaba, doodda ah yaa awood u leh in uu buriyo ama qaado dacwadaha dastuurka, waxaa jira laba hannaan oo dalalku ay kala adeegsadan. Tan kowaad oo ah hannaanka awooddu leedahay hal maxkamad waxaana loo yaqaan (Centralised/European model) oo macnaheedu yahay in awoodda dacwadaha dastuurka la xiriira ay leedahay oo keliya hal maxkamad oo ah tan ugu sarreysa[36]. Tan labaad oo ah hannaanka baahsan (Decentralised model), waana in dhammaan maxkamadaha ay wood u leeyihiin in ay dhagaystaan dacawadaha dastuurka, iyada oo ay jirayso racfaan looga

[36] Noocaan waxaa aad u adeegsadan dalalka Yurub iyo wadamo kale.

qaadanayo maxkamdda ka sarreysa.[37] Sidaa oo kale, dalalka federaalka ah intooda badan waxa ay leeyihiin Maxkamad sare oo awood u leh in ay qaaddo dhammaan dacwadaha dastuurka iyo kuwo kalaba, halka dalalka qaar ay leeyihiin Maxkamad Dastuur oo gooni ah, iyada oo ay jirto Maxkamad sare oo aan awood u laheyn arrimaha dastuurka sida Koonfur Afrika.

Dastuurkii 1960-kii waxa uu dhisayey Maxkamad Sare oo leh awoodda garsooridda dacwadda dastuurka iyada oo isku beddelaysa Maxkamad Dastuur[38], iyada oo lagu soo darayo xubno dheeraad ah. Dastuurkii 1979-kii waxa uu dhisayey Maxkamad Dastuur oo xubnaheedu ka kooban yihiin Garsooreyaasha Maxkamadda Sare oo ay kaabayaan xubno dheeraad oo uu magacaabayo Madaxweynuhu[39] .Dastuurkii 1990-kii waxa uu dhisayey Maxkamad Sare oo isu beddelaysa Maxkamad Dastuur oo lagu soo kaabayo xubno dheeraad ah[40]. Axdigii Federaalka KMG ahaa waxa uu awood dhammaystiran u siiyey Maxkamadda Sare dhegaysiga iyo go'aan ka gaarista khilaaf kasta oo saameynaya Axdiga Federalka Ku Meel Gaarka ah iyo shuruucda kale[41].

Shareecada ka sokow, Dastuurka JFS waa sharciga dalka ugu sarreeya, dastuurada DXDF iyo xeerarka kale oo dhan waxaa khasab ah in ay waafaqsan yihiin, haddii kale waa waxba kama jiraan[42].

Markii ugu horreesay taariikhda Soomaaliya, Dastuurka KMG ahi ayaa si buuxda u faray asaasidda Maxkamadda Dastuurka oo gaar ah isaga oo qeexay xubnaheeda iyo awoodaheeda, balse ilaa hadda lama dhisin sababo badan awgood oo ay ka mid yihiin mid siyaasadeed, sharci iyo dhaqaalaba[43].

[37] Nidaamkan waxaa adeegsada Maraykanka iyo dalalka xiriirka taariikhiga ah la leh hannaaka sharci ee loo yaqaan (Anglo-American legal tradition), marka laga reebo dalal uu ka mid yahay Koonfur Afrika oo leh Maxkamad Dastuurka oo gaarh ah.
[38] Qodobada 98 iyo 99.
[39] Qodobka 107.
[40] Qodobka 114.
[41] Qodobka 60.
[42] Qodobka 4aad ee Dastuurka KMG ah.
[43] Qodobka 109(B).

### 6.5 Dhisidda Maxkamadda Dastuurka ee ku habboon Soomaaliya

Maaddaama cilmibaaristani ay soojeedisay in hannaanka ugu habboon uu yahay nooca isku dhafka ah, taas oo macnaheedu yahay in dhammaan dacwadaha heer Dawlad-Goboleed ku dhammaanayaan Dawlad-Goboleedka ay khuseyso, halka dacwadaha heer federaal oo kooban ay u soo gudbayaan Maxkamadda Sare ee DFS, Cilmibaaristani waxa ay soojeedinaysaa in awoodaha Maxkamadda Sare ee DFS lagu daro awoodaha dacwadaha dastuurka oo aan loo baahnayn dhisidda Maxkamad Dastuur sababahan hoos ku xusan[44]:

1. Dhismaha Maxkamad cusub oo dastuur oo aan shaqo badan qabaneyn waxa uu keeni karaa culays dhaqaale, sharci iyo farsamo.
2. Dacwadaha badankoodu waxa ay ka bilaaban doonaan kuna dhammaan doonaan DXDF, taas oo ka dhigan in dacwado kooban oo federaal ah racfaan loogu qaadanayo Maxkamadda Sare ee heer Federaal.
3. Taariikhdii soojireenka ahayd ee Soomaaliya oo dhammaan dastuurradii iyo Axdiyadii ay qeexeen Maxkamadda Sare oo awood u leh dhammaan dacwadaha dastuurka, iyaga oo ku kala duwan sida loo soo magacaabayo xubnaha ku soo biiraya Maxkakmadda sare kolka ay isku beddelayso Maxkmad Dastuur.
4. Dalalka federaalka intooda badan waxa ay leeyihiin Maxkamad Sare oo keli ah oo awood u leh dacwadaha dastuuriga iyo kuwa aan ahayba. Tusaale, Ethiopia, Nigeria, India, Pakistan, Brazil, Mexico, USA, Canada, Australia iyo Switzerland, dhammaan dalalkan oo ah kuwo Federaal ah, waxa ay leeyihiin maxkamado ka garsoora nooc kasta oo dacwad oo sharcigu awood u siiyey oo ay ku jiraan kuwa dastuuriga ahi.

### 6.5 Qaab-dhismeedka Maxkamadaha

Daraasadani waxa ay soojeinaysaa qaab-dhismeedka Maxkamadaha in uu noqdo:

- Maxkamadaha Darajada Kowaad: Degmooyinka iyo gobollada.
- Maxkamadda Racfaanka Dawlad-Goboleedyada;
- Maxkamadda Sare ee Dawlad-Goboleedyada; iyo
- Maxkamadda Sare ee Federaalka oo awood u leh dhammaan dacwadaha oo ay ka mid yihiin kuwo dastuurka.

---

[44] Dhismaha Garsoor Fadaraal ah, ay khuburo sharci diyaariyeen,2022.

Hannaanka Garsoorka Caasimaddu waxa uu yeelanayaa hadba maqaamka ay yeelato Caasimadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qaab-dhismeed Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud:

- Heer Federaal: Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo wakiilladiisa.
- Heer DXDF: Xeer-Ilaaliyaha Guud ee DXDF iyo wakiilladiisa.

## 7. Caqabadaha Hortaagan Federaaleynta Garsoorka

Darasaddani waxa ay soo bandhigaysaa caqabadaha dhismaha garsoor federaal ah:

1. In aan heshiis siyaasadeed oo wada-ogol ah laga gaarin weli nooca ugu habboon garsoorka dalka.
2. In Dastuurkii Soomaaliya uu weli ku socdo dib-u-eegis.
3. In garsoorku uusan hortabintii uu lahaa ka helin Dastuurka KMG ah oo aan wax badan ka sheegin garsoorka, inta uu xusayna ay abuurayso mugdiyo.
4. In shuruucdii iyo xeerarkii dalka aan weli dib u habeyn lagu sameyn.
5. In qaab-dhismeedka maxkamdaha iyo xafiiska Xeer-Ilaalinta uu ku qotomo hannaankii ay Soomaaliya lahaan jirtay.
6. In hay'adaha garsoorka dalka ay kala go'an yihiin oo racfaan iyo maamul midna uusan ka dhexeyn.
7. In tayadii loo baahnaa aysan helin weli hay'adaha garsoorka.
8. In aan kaabayashii garsoorka weli si fiican dib u habeyn loogu sameyn.

## 8. Gunnaand

Gasoorka Soomaaliya waxa uu soo maray xilliyo aad u adeg balse hadda waxa jira horumar[45] la taaban karo oo u baahan in taageero mug leh lagu kabo si loo dhammaystiro dib u habeynta hay'adaha garsoorka. Waxaa lagu shaqaalaysiiyey tartan furan oo hufnaan leh garsooreyaal, Xeer-Ilaaliyeyaal iyo hawl-wadeenno kale iyo casriyeenta maamulka dacwadaha (Electronic Case Management System), iyo asaasidda Machadka Tababarka Garsoorka oo ay wada-saxiixeen dhammaan Guddomiyaha Maxkamadda Sare, Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka,

[45] Buuga Garsoorka ee 2021: Warbixin Sannadeedka Garsoorka JFS ee 2021, Qodobka: 6.

Guddoomiyeyaasha maxkmadaha sare DXDF iyo Xeer-Ilaaliyeyaasha DXDF. Sidaa oo kale, waxaa saxiixay Wasiirkii Caddaaladda XFS ee xilligaas[46].

Cilmibaaristani waxa ay adkeenaysa in ay ma hurto tahay in garsoorka dalka la federaaleeyo si loogu adeego shacabka Soomaaliyeed ee u hammuun qaba hannaan caddaaladeed oo leh madaxbannaani, karti, aqoon, hufnaan iyo la xisaabtan. Hannaankas caddaaladeed waxa uu qeyb weyn ka noqonayaa xasiloonida iyo dhisidda dawladnimad Soomaaliyeed.

## 9. Talo Soojeedin

Cilmibaaristani waxa ay soojeedinaysaa talooyinkan soo socda si loo dhammaystiro dhisamaha Garsoor Faderaal ah:

- In madaxda fulinta ee DFS iyo DXDF ay heshiis ka gaaraan hannaanka ugu habboon dalka.
- In heshiiska siyaasadeed ee hannaanka Garsoorka lagu daro dib u eegista dastuurka si ay u ansixiyaan Barlamaanka federaalka ahi labadiisa aqal.
- In hortabin la siiyo cutubka garsoorka iyada oo lagu faahfaahinayo dhammaan waxyaabaha muhiimka ah ee u baahan in lagu daro dastuurka, waana in la sameeya Xeerka Nidaamka Garsoorka oo ku dhisan heshiiska Siyaasadeed iyo Dastuurka la isku raacay.
- In dib u habeyn lagu sameeyo shuruucda dalka iyada oo la dhisayo Guddiga Dib u habeynta Shuruucda, kuwaas oo ka tarjumaya diinta, dhaqanka iyo duruufaha u gaarka ah dalka.
- In la dhiso Golaha Sare ee Garsoor oo loo dhan yahay heer federaal iyo heer DXDF.
- In loo qoondeeyo miisaaniyad u gaar ah oo uu u madaxbannaan yahay Golaha Sare ee Garsoorka.
- In la helo hannaanka ugu habboon ee lagu hubin karo madaxbanaanaanta garsoorka, iyada oo si gaar ah loo adkeenayo magacaabista iyo xil ka qaadista.
- In la tayeeyo hay'adaha Garsoorka ee dalka.
- In mudnaan gaar ah la siiyo Machadka Tababarka Garsoorka ee dhowaan la aasaasay, si kor loogu qaado tayada, aqoonta iyo xirfadda xubnaha hay'adaha garsoorka.
- In hay'ada la xiriira hay'adaha garsoor sida booliiska dib u habeyn lagu sameeyo si ay ula jaan-qaadan hannaanka cusub ee garsoorka.

[46] Axdiga Machadka Tababarka Garsoorka ee la saxiixay 8 luulyo,2021, Muqdisho, Soomaaliya.